



Gacaliye Lammaane,

Baadhitaan heer qaran ah oo dhowaan la sameeyay ayaa lagu ogaaday in kala badh waalidiinta oo dhami ay ka walaacsan yihiin in carruurtoodu dib u dhacaan sababo la xiriira xidhitaanka dugsiga. Toddobaadkan waxaan rabnay in aanu la wadaagno tilmaame ka caawinaya waalidiinta inay hubiyaan in waxbarashada carruurtoodu aanay joogsanayn xagaaga.

Tallaabada Xagaaga

Waxaa loo sameeyay isla dadka kale ee ka dambeeya [Readiness Check](#) (qalab ka caawinaya qoysaska helidda 'hubinta akhriska' ee u diyaargarawga waxbarashada ee carruurtooda), [Summer Stride](#) wuxuu bixiyaa shan talo oo loogu talagalay waalidiinta si ay uga caawiso u diyaarinta carruurtooda guusha xagaagan iyo sannad dugsiyeedka soo socda.

Talooyinka waxaa ka mid ah hubinta macallinka carruurta kahor inta aanu dhammaan sannad dugsiyeedku, taakuleynta xirfadaha-dareemaha-bulsheed, iyo sidoo kale khayraad dheeraad ah oo lagu ilaaliyo xisaabta iyo xirfadaha akhriska inay noqdaan kuwo fiican xagaaga oo dhan. Halyeeyada waxbarashadu waxay ujeeddadoodu tahay inay ka caawiyaan waalidiinta inay la helaan 'tallaabada xagaaga' kahor xitaa intaanu dhammaan sannad dugsiyeedku.

[Baadh Tallaabada Xagaaga!](#)

Sidaan u soo dhawaynayno xagaaga, waxaan jeclaan lahayn in aan maqalno sida aad u taageereysid qoysaska (iyo ardayda) si ay u helaan xagaa kobcinaya. Noo soo sheeg fikradahaaga!

Annaga oo kaashanayna



Osman Ahmed

Agaasimaha Iskaashatada Bulshada

P.S. Waxaan rabnay in aanu ku xasuusino in isdiiwaangalinta [Camp Kinda](#), oo ah xero xagaa muhiim ah taas oo bixinaysa fikradaha ku saabsan ku lug lahaanshaha waxqabadyada carruurta, hadda waa ay furantahay, xeraduna waxay bilaabatay Isniintan.



Together, we can
transform futures
for our kids &
communities